



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
BANADIR REGIONAL COURT
QEYBTA CIQAABTA

SUM: MGB/DCL/1531/2024

Tr: 27/11/2024

Ku: Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed

=Muqdisho=

Og: Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud Ee Qaranka

=Muqdisho=

UJEEDDO: Amar Soo Qabasho iyo Horkeenis Maxkamadeed Si Waafaqsan Qod.40,41-
XHCS.

Tixraac: Warqadda Summadeedu tahay MS/XG/76/2024 kuna taariikhaysan 26/11/2024, ujeedadeeduna tahay Ogalaansho Ikhtisaas Dacwad, kana soo baxday Maxkamadda Sare JFS.

Tixraac: Warqadda Summadeedu tahay XXIG/G.7138/2024 kuna taariikhaysan 27/11/2024, ujeedadeeduna tahay Codsii Soo saarid Amar soo qabasho (Waraan) Si Waafaqsan Qod. 40, 41,42-XHCS, kana soo baxday Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud Ee Qaranka.

Haddaba, Maxkamadda Gobolka Banaadir waxa ay aqbashay codsiga sare ku xusan ee kasoo baxay Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud Ee Qaranka.

Sidaas darteed, Waxaa la farayaa Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed ee warqadaani sida tooska ah ugu socoto in aad soo qabatid isla markaasna horkeentid Maxkamadda Gobolka Banaadir Eedaysane Axmed Maxamed Islaan (Axmed Madoobe), ina Yustur Aw-Cabdi Haaruun.

Kaas oo lagu eedaynaayo Qod.184,186,217 Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, oo ah in uu ku kacay faldambiyeedyo lid ku ah Wadajirka iyo Midnimada Qaranka Soomaaliyeed (Khiyaano Qaran) iyo faldambiyeed lid ku ah Xog lala wadaago Dal Shisheeye ujeeddo dagaal lid ku ah Qaranka Soomaaliyeed, sidoo kalena uu ku kacay faldambiyeed lid ku ah Nidaamka iyo Dastuurka Dalka.

Saalax Cali Maxamuud

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANAADIR



Address :HQ Office, H.Weyne District, London Road , Mogadishu, Somalia

Tell: +252 770498000

Email: Chairman@mgb.gov.so, Publicrelations@mgb.gov.so



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
BANADIR REGIONAL COURT
QEYBTA CIQAABTA

SUM: MGB/DCL/1531/2024
MGB/BQ/97/2026

Tr: 29/01/2026

UJEEDDO: QARAAR MAXKAMADEED SI WAAFAQSAN QOD.76 XHCS

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Markay Aragtay: Gal dacwadeedka summadiisu tahay MGB/DCL/1531/2024 kana furan Maxkamadda Gobolka Banaadir, oo uu eedaysane ka yahay Axmed Maxamed Islaan (Axmed Madoobe) ina Yustur Aw-Cabdi Haaruun, kuna eedaynaa Qod.184,186,217 Xeerka Cigaabta Soomaaliyeed.

Markay Aragtay: Warqadda Summadeedu tahay XXIG/G-7138/2024 kuna laariikhaysan 27/11/2024, ujeedadeeduna tahay Codsii Soo saarid Amar soo qabasho (Waraan) Si Waafaqsan Qod. 40, 41-XHCS, kana soo baxday Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud Ee Qaranka.

Markay Aragtay: Warqadda Summadeedu tahay MGB/DCL/1531/2024, kuna Tr.27/11/2024, ujeedadeeduna ahayd Amar Soo qabasho iyo Horkaanis Maxkamadeed Si Waafaqsan Qod.40,41-XHCS, kana soo baxday Maxkamadda Gobolka Banaadir.

Markay Aragtay: Warqadda summadeedu tahay XXIG/G-7138/2024 kuna Tr:29/01/2026 ujeedadeeduna tahay gal xirid waafaqsan Qod. 72 XHCS kana soo baxday Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka.

Markay Aragtay: Qod.70/1 Xarafka B/2 iyo Qod.76 XHCS.

GO'AANKA MAXKAMADDA

Maxkamaddu ayada oo cuskanaysa asbaabta sare ku xusan si waafaqsan qod: 107/3 dastuurka ku meel gaarka gudancysana waajibka saaran ee ku xusan qod 76,77 XHCS Waxay:

- 1- Ooduy gal dacwadeedka ciqaabta ah ee summadiisu tahay MGB/DCL/1531/2024, oo eedaysane ka ahaa Axmed Maxamed Islaan (Axmed Madoobe).
- 2- Maxkamaddu Baabi'isay Amarka Soo qabasho iyo Horkaanis Maxkamadeed ee summadiisu tahay MGB/DCL/1531/2024 kuna laariikhaysan 27/11/2024.
- 3- Go'aankaan waxaa la gaaray Tr: 29/01/2026.

Shukrih Macallin Aadan

K/S GUDDOOMIYAH MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR



Address: HQ Office, H.Weyne District, London Road , Mogadishu, Somalia.

Tell: +252 770498000

Email: Chairman@mgb.gov.so, Publicrelations@mgb.gov.so